



XAQIIQOYIN KOOBAN OO KU AADAN

Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee Qoyska

Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad oo qiimo jaban ah.

NY State of Health ayaa ah Suuqa rasmiga ah ee Caymiska caafimaadka York.

Maanta Isqor.



Booqo barta onleenka ah ee nystateofhealth.ny.gov



Wac taleefanka
1-855-355-5777
TTY
1-800-662-1220



Toos ugu tag Kaaliyaha adoo kala xariiraaya info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Daryeelka caafimaadka ilkuhu waa qayb u ah caafimaadkaaga iyo faya dhawrkaaga guud. Laakiin waxaa jiro waxyaabo ay tahay inaad ka fakarto **ka hor intaadan iska qorin caymiska caafimaadka ilkaha.**

1 Miyuu Qualified Health Plan (QHP) ku jiraan gunooyinka caafimaadka ilkaha e qoysku?

- Haddii aad u baahan tahay caymis caafimaad oo ilkaha ah kaasoo daboolaa adeegyada dadka waawayn oo ay la socdaan carruurta, waxaad samayn kartaa labo midkood:
 - Inaad raadiso QHPs ka jirta degmadaada oo ay adeegyadeeda ku jiraan gunooyinka caafimaadka ilkaha dadka waawayn adoo adeegsanaya Dental Plan Comparison Tool (Aalada Isbarbardhiga Caymiska Caafimaadka Ilkaha) ood ka helayso websetta Suuqa Caymiska oo ah: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/resource/dental-plan-comparison-tool>; ama
 - Ka soo iibso caymiska caafimaadka ilkaha ee qoyska oo kaligiis ah meel ka baxsan QHP.¹
- Si aad u hesho caymis caafimaad oo daboolaa kaliya carruurta, waxaad ka heli kartaa gunooyinka caafimaadka ilkaha carruurta midkood inaad ka hesho QHP gaaga ama caymis caafimaadka ilkaha ah oo kaligiis shaqeeya.²

2 Waa maxay adeegyada caymiska caafimaadka ilkaha ee qoysku bixiyaa?

- Caymisyada caafimaadka ilkaha ee qoysku waxay leeyihiin laba heer oo kala duwan oo adeeg ah:
 - Gunooyinka Caafimaadka Ilkaha ee Carruurta
 - Gunooyinka Caafimaadka Ilkaha ee Dadka waawayn
- Gunooyinka caafimaadka carruurta waxay ka koobmaan afar qaybood oo waawayn:
 - Ka hortagga/Aasaasiga ah
 - Daryeel joogto ah
 - Daryeelka wayn
 - Qurxinta ilkaha
- Gunooyinka dadka waawayn qaar kamid ah ama dhammaan afarta qaybood ee gunooyinka ah.

¹ Waxaa qasab ah inaad ka diiwaan gashan tahay Qualified Health Plan (QHP) si aad iskaga qorto caymiska caafimaadka ilkaha oo kaligiis shaqeeya.

² Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan gunooyinka caafimaadka carruurta, ka fiiri *Xaashida Xogta ee NY State of Health Pediatric Dental Coverage (Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee Carruurta)*.

XAQIIQOOYIN KOOBAN OO KU AADAN

Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee Qoyska

3 Waa maxay adeegyada ku jira gunooyinka caymiska caafimaadka qoyska?

Qaybta Adeegga	Tusaalaha Adeegga	Caymiska Daboolaaaya Carruurta?	Caymiska Daboolaaaya Dadka waawayn?
Ka hortagga/Aasaasiga ah	Naddiifinta, daawada fluoride iyo xajinta ilkaha	Markasta	Inta badan, way kala duwan yihiin caymis kasta
Daryeel joogto ah	Baaritaanada, raajooyinka, buuxinada fudud iyo bixinta ilkaha	Markasta	Mararka qaar, way kala duwan yihiin caymis kasta
Daryeelka wayn	Qaliinka afka, galinta ilkaha, buuxinta ilkaha, adkaynta, iyo bixinta miciyaha	Markasta	Mararka qaar, way kala duwan yihiin caymis kasta
Qurxinta ilkaha	Biraha lagu xiro ilkaha si loo adkeeyo ilkaha	Markasta	Mararka qaar, way kala duwan yihiin caymis kasta

- Qarashaadka jeebkaaga ka baxaaya ee la xariira adeegyada caafimaadka ilkuhu way kala duwanaan karaan si wayn caymis kasta. Waa inaad doorataa caymis ay ku jiraan adeegyada aad aaminsan tahay in qoyskaagu u baahan karo.

4 Waa meeqa qiimaha caymiska caafimaadka ilkaha ee Qoysku?

- Caymis kasta oo ilkaha ah wuxuu leeyahay qarashaad cayiman. Qarashaadkaan waxaa ku jiri kara lacagaha joogtada loo baxsho, lacagaha caymisku jarto, qarashaadka ugu badan ee aad jeebkaaga ka dhiibayso, iyo cadadka ugu badan ee gunooyinka aad sanadkii heli karto. Qarashaadkaan way kala duwan yihiin caymis kasta.
- Marka lagu daro qarashaadka cayiman, waxaa jira shuruudo la xariira wadaagista qarashka oo sidoo kale kala duwan caymis kasta. Shuruudaha wadaagista qarashku waxay ku xiran yihiin qaybta adeegga iyo haddii qofka adeegga helaayo uu yahay ilmo carruur ah ama qof wayn.
 - Gunooyinka caymisyada caafimaadka ilkaha ee carruurta** waxay leeyihiin xadi u cayiman qarashka ugu badan ood jeebkaaga ka dhiibayso sanadkii kaasoo ah \$350 cunugiiba ama \$700 qoyskiiba. Lacagtaan waa cadadka ugu badan ee aad dhiibayso inta lagu jiro sanadka caymiska. Ma helayaan adeeg ama mudooyinka sugitaanka ee gunooyinka carruurta.
 - Gunooyinka caafimaadka ilkaha ee dadka waawayn** caadiyan malaha xadi cayiman oo u dagan qarashka ugu badan ee aad jeebkaaga ka dhiibayso. Laakiin waxaa jiri kara xadi sanadkii uu dagan gunada. Cadadkaan waa kan ugu badan ee caymiskaagu uu dhiibi doono inta lagu jiro sanadka caymiska. Waxaad masuul ka tahay qarashaad kasta oo caafimaadka ilkaha qofka wayn ku baxa oo ka badan cadadkaan ugu badan. Waxaa intaas dheer, waxaa jiri karo mudooyinka sugitaanka oo loo samaynaayo adeegyada qaar.³

5 Sidee ayaan ku heli karaa caymiska caafimaadka ilkaha oo ku haboon qoyskayga?

- NYSOH Dental Plan Comparison Tool (Aalada Isbarbardhiga Caymiska Caafimaadka Ilkaha ee NYSOH) ayaa kuu sahlaya inaad is barbardhigto qarashaadka iyo faa'iidooyinka caymisyada kala duwan ee caafimaadka ilkaha carruurta.⁴ Waxaad ka heli kartaa barta Suuqa oo ah: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/resource/dental-plan-comparison-tool>
- Webseetka Suuqu wuxuu sidoo kale leeyahay Aalada Laga Raadsho Adeeg Bixiyaasha iyo Caymiska Caafimaadka ee NYS, taasoo kutusi doonta liiska dhakhaatiirta ilkaha ee ku jira caymis kasta. Waxaad ka heli kartaa barta: <https://pndslookup.health.ny.gov/>

³ Caymisyada ku qoran liiska ku jira webseetka aalada adeegga ee Suuqa Caymiska ayaa muujinaaya "WP" haddii ay leeyihiin muddo aad sugayso wax kamid ah adeegyada caymisku daboolo.

⁴ Markaad baarayso caymisyada caafimaadka ilkaha, xaqiiji inaad raadinayso xogta gunada caymiska dadka waawayn ee aad u rabto dadka waawayn ee gurigaaga ku dhaqan, aadana fiirinayn xogta caymiska caafimaadka carruurta.

Si usted habla un idioma diferente al inglés, los servicios de asistencia de idioma están disponibles gratis para usted. Llame al 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220).

如果您使用的語言不是英語，您可以使用我們的免費語言支援服務。請致電 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)